



Kutaanta Guriga

Bed Bugs

Waa maxay kutaanka Gurigu?

Kutaanta gurigu waa cayayaan aan baalal lahayn oo quuta dhiiga xayawaanka dhiiga diiran sida dadka. Marka ay ugxanta dhalaana, ugxantaasi waxa ay le'eg tahay qanshicilka injirta. Kutaanka waaweyni dhererkeedu wuxuu gaaraa ¼ hiis. Cadaanka ayey midab ahaan aad ugu dhawaadaan kolka ay xuub siibtaan ka dib. Ka dibna jaalle, giirgiirnaan, ama casaan ayey noqdaan. Kolka ay wax cunaan waxaa laga yaabaa inay bar madow oo soo kuusan bartanka ku yeeshaan. Markii lagu sharqama waxa ay ku dhuuntaan tararada ama baqbaqyada mugdiga ah.

Kutaanta gurigu waa ay jeceshay meelaha diiran. Kutaanta gurigu waxa ay inta badan socotaa habeen barkii kolka dadka ay hurdaan. Laakiin waxaa laga yaabaa in soo baxaan maalintii cadeydii hadii ay gaajo qabato.

Kuntaanka guriga waxa ay cunayso waxay u jirsataa 7 fiit.

Waxa ay noolaan karaan ilaa iyo dhowr bilood iyadoon waxba cunin, waxa ayna imaan karaan iyagoo cunto doon ah. Kutaanta guriga aad bay ugu fiican yihiin "daba-qabsiga". Waxa ay isku ku dhajin karaan dharka iyo kabaha, waxa ay ku dhuuman karaan kuraasta, boorsooyinka iyo baakadyada lagu guuro, si ay u tagto meel ay cunto ka heli karto. Sidatan waa sida ay kutaantu ku tagto meel walba sida, shaneemooyinka, dukaamada dharka iyo guryaha dabaqyada ah.



Sidee ayaan ku ogaan karaa in gurigaygu kutaan leeyahay?

Dadka intiisa badani waxa ay ku ogaadaan in gurigoodu kutaan leeyahay ka dib kolka ay qaniinto. Kolka ay xoqaan qaniinyada, waxaa dhici karta in meeshu boog noqoto. Dadka oo dhani isku si kuma wada noqdo qaniinyada kutaanka, boogna ma wada yeeshaan kolka ay xoqaan qaniinyada. Taa ayaa ka dhigta mid dhib badan in la ogaado guriga kutaantu ka imaanayso ee guriyaha dabaqyada ah.

Kutaantu kolka ay wax qaniinto waxa ay reebtaa wax u eg dhiig qalalay. Mar hore ka eeg go'a sariirtaada. Ka dibna eeg joodariga, gaar ahaan ka eeg geesaha. Ka eeg dhibco yar yar oo midab koodu bunnii yahay. Waa la arki kartaa kutaan roon-roon khaasatan marka ay dharagsan tahay.

Kutaantu badanaa dibada iskama soc-socoto hadii aysan raxan raxan u wada socon. Waxa ay jeceshahay in ay isku qariyaan joodariyaasha, meelaha u dhaxeeya isbuunyoooyinka, iyo baqbaqyada aafaha guriga iyo agagaarka sariiraha, ilaa iyo inta ay diyaar u noqonayaan inay wax cunaan.

Fatayaasha guryaha ee magaalada ayaa imaan kara gurigaaga kana baari kara kutaanta guriga. Ama waxaad qabsan karaa shirkad qaabilsan ciribtirka xasharaadka (exterminators) si ay u baarto gurigaaga. Waxaad heli kartaa qoraal oranaya guriga aad kiraysatay wuxuu leeyahay kunaan.

Kolka aad ogaato in gurigu kutaan leeyahay, waa in aad markiiba talaabo qaado si aysan ugu faafin carada oo dhan aadna markiiba u ciribtirto kuligeedba.

Gurigeysgu wuxuu leeyahay kutaan. Maxaan sameeyaa hada?

Ka digtoonow in aad lacag aad leedahay aad ku kharash garayso sunta kutaanka ee dukaamada laga gato. Waxaa fiican in aad arintaa loo daayo xirfedlayaashu inay wax ka qabtaan.

Qoraal ugu sheeg qofka guriga is leh markiiba hadii aad u malaysanyo in gurigaagu uu kutaan leeyahay. U dir koobi warqada wargelinta ah iyo warqad kale qofka guriga leh si aad uga codsatsid inuu kutaanta ciribtiro.

Hadii qofka guriga lehi uu isku dayi waayo in uu wax ka qabto dhibaata kutaanta, waxaa jira waxyaabo aad sameyn karto.

- Waxaad wici kartaa fatashe guryaha ee magaaladaada si aad uga baaro gurigaaga kutaan. Fatashaha guryahu waa uu ganaaxi karaa qofka guri leh ogolaanshaha uu ogolaatay in dhismahiisu kutaani ku dhalato wuxuuna u sheegi karaa qofka guri leh inuu wax ka qabto dhibka. Fatashahu wuxuu qabtaa muddo wax looga qabanayo dhibka. Hadii mudaddaa la dhaafay isagoon qofka guriga lehi wax ka qaban arrintii, waxa aad bilaabi kartaa in aad kirada qaar kala harto.
- Waxaad bilaabi kartaa kiis kiro ah oo aan la baadhi karin iyada oo aan kormeer ahayn. Hadii 14 cisho ay ka soo wareegay markii aad warqada u dirtay qofka guriga leh walina gurigii kutaantii leedahay, kolkaa waa bilaabi kartaa inaad kirada qaar ka reebto.



Ka eeg waraqada war-gelinta ee [Ka Helida laqa helayo in Qofka quriga lehi uu Haqaajiyo wixii Halaaba](#) si aad u ogaato sida loo xareysto dacwooyinka caynkan ah.

Ogow: Qofka guriga leh iyo dadka taakuleeya kireystayaasha kuma heshiiyaan waxa la rabo in qofka guriga lehi uu sameeyo si loo ciribtiro kutaanta. Qaar ka mid ah dadka guriyaha lahi iskuma dayaan gabi ahaanna inay ciribtiraan kutaanta, in kastoo sharcigu yiraa waa mas'uuliyada qofka in uu dayactiro guriga. Waa cadahay in dadka guryaha lehi ay jabinayaan sharciga Minnesota.

Ciribtireyaasha Xirfadleyaasha ah

Dadka guryaha lehi intooda badani waxa ay qabsadaan dad xirfad u leh ciribtirka kutaanta si ay uga takhalusaan. Ka takhalusida kutaantu waxa ay qaadan kartaa asbuucyo iyo saacado badan oo diyaar garow ah.



Waxaad u baahan tahay in aad gabi ahaanba gacan siiso hawsha looga ciribtirayo kutaanta gurigaaga. Tusaale ahaan, nadiifi gurigaaga iskana tuur wixii alaab ah ee aadan u baahnayn ee meelaha daadsan. Sumaynta kutaantu waxa ay u badan tahay in aysan shaqeyn hadii gurigaagu ay alaabi meel walba taal. Hadii aadan ku dadaalin caawinta lagaa rabo, waxaa laga yaabaa in sumeyntu shaqeyn waydo iyo/ama in qofka guriga iska lehi uu jid u yeesho inuu guriga kaa saaro.

Waa cidee cida ay tahay inay bixiso?


Waa cadahay in qofka guri ahi uu hagaajiyo wixii guriga ka halaabo. Hagaajinta waxaa ku jira dilida xasharaadka sida kutaanta. Qofka guriga lehi waa inuu bixiyaa kharashka ciribtirka in kastoo qaarkood ay diidaan.

Mar mar badan, qofka guriga lehi wuxuu bixiyaa kharashka ka dillida kutaanta guriga laakiin ma bixiyo kharashka u diyaarinta guriga kutaan ka dillida. Ama ay gartaan in isticmaalka guriga aad isticmaalaysaa ay yaraanayso xilliga asbuucyada ah ee kutaanta la ciribtirayo iyo inay dhici karto in la yareeyo kiradaada. Arrimahaasi waa kuwa u baahan in maxkamadi go'aamiso.

Hadii aad bugto oo aad u baahan tahay caawimaad ah diyaarinta gurigaaga, waxaa dhici karta in qofka guriga lehi uu u baahan yahay inuu ku siiyo caawimaad sida ay qabaan sharciyada (Fair Housing Act iyo Minnesota Human Rights Act.). Waydiiso caawimaad adigoo qoraal codsi ah u gudbinaya qofka guriga leh koobina kala har qoraalka oo hayso. Ka eeg waraqada war-gelinta ee, [Reasonable Accommodations](#).

Indhahaaga fur si aad u arato wixii calaamad ah ee muujin kara inay kutaani jirto!

Ka takhalusida kutaantu muday qaadataa. Gurigaagu waxaa laga yaabaa in uu u baahdo dhowr goor in la sumeeyo ka hor inta aan dhamaan laga dhameyn kutaanta. Kutaantu waxa ay noolaan kartaa muddo dheer waxayna u badan tahay in ay ukun guriga ku dhasho ukuntaa oo dilaaci doonta aakhirka. Ogow in alaab badan ay daboolnaan doonto mudo siina wad sameynta wixii kale ee aad sameynaysey si ay u joojiso ugu yaraan hal sanno.



Waa inaad ka caajisin aadna sii wado inaad la shaqeyso ciribtiraha Xirfadlaha ah. Raac talaabooyinka dilida kutaanta ilaa iyo inta ay kaaga sheegayaan in kutaantii ku dhalatay guriga laga takhalusay.


Maxaan sameyn karaa si aan uga ilaaliyo in kutaantu aysan sii faafin?

Runtii suurta gal ma ah inaad adigu kaliyaa ka takhalusto kutaanta. Laakiin, waxaa jira waxyaabo aad sameyn karo oo aad ku caawin karto inaysan sii faafin kutaantu.

- **Kuleylka xad-dhaafka ahi waa uu dilli karaa kutaanta.** Dharka waa laga dili karaa kutaanta hadii lagu kuleeliyo kulul heerkiisu yahay 97-99 digrii. Ku dhaq dharka iyo gogoshaba heer kulka ugu sareeya ee suurta galka ah (iyadoo la halaynayn) ka dibna ku qalaji wareeg "kulul" ee qalajisada 45 daqiiqo. Waad gelin kartaa wareega kulul ee qalajisada hadii aadan haleeli karin in aad ku dhaqdo heer -kul sare.

- **Ku rid dharka iyo gogosha nadiifka ah bac xiran** si aad uga ilaaliso inay kutaantu dib u gasho. Sidoo kale gali dharka iyo gogosha bac aan la isticmaalin oo xiran ka dib kolka laga soo saaro qalijisada. Soo hel galal goodariyaashu leeyihiin oo loogu tala galay inay joodariyada ka ilaaliyaan in kutaantu gasho.
- **La hadal dariskaaga kolka aad ogaato in gurigaagu kutaan leeyahay.** Haddii aad ku nooshahay dhismo dabaqo badan ka kooban ama abaartomiinto, waa muhiim in aad markiiba talaabo qaadid si aad uga hor tagtid faafida kutaanta. U sheeg dariska in aad ka heshay gurigaaga kutaan si kolkaa ay u ogaadaan in dhibi ka jiri karo dhismaha. Tani waxay kaloo ku siin doontaa fursad aad ku waydiiso dariska haddii ay og yihiin hada ama in mar hore ay ka jirtay dhismaha ama guri ka mid ah dhibaatooyin la xiriira kutaanta.
- **Ha soo qaadan alaab dad iska tuuray.** Iska ilaali in aad soo qaadato shayaasha sida joodariyada ama fadhayada haanta qashin agteeda looga tago ama wadada geeskeeda la dhigo si qashinka loogu daro. Cidey rabto ha noqotee cida iska tuuraysaa sabab uun bay isaga tuur.

Haddii aad ka gadato kuraas, joodari ama dhar, dukaamada alaabta duuga ah gada ee alaabta jaban, si taxadar leh uga eeg wax astaan oo muujinaya kutaan ka hor inta aadan guriga keenin alaabtaa.



Maxaan ku sameeyaa alaabtayda kutaantu gashay?

Qaar ka mid ah alaabta waa ay ka dili karaan kutaanta ciribtireyaasha xirfada lehi. Haddii ay kutaantu si xun u gashay alaabta waxaa roon in la iska tuuro. **HA KU** xoorin alaabta kutaantu gashay meel dad kale ay ka qaadan karaan. Taasi waxay keeni kartaa in kutaantu ay sii faafto.

Uga qaad alaabta gurigaaga qaab aysan kutaantu ugu faafi karin dhsimaha intiisa kale.

Weydii mulkiilahaaga ama qashin-dilaha inuu kaa caawiyo inaad ka takhalusto alaabta guriga leh dhiqlaha.

Waxaad ka heli kartaa akhbaar dheeraad iyo khayraadba shabakada:

www.health.state.mn.us/divs/idepc/dtopics/pests/bedbugs.html

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**